



GUDDIGA KMG DOORASHOYINKA PUNTLAND

HAB-DHAQANKA IYO JADWALKA
OLOLAHA URURADA EE DOORASHADA
GOLAYAASHA DEEGAANKA 3-DA
DEGMO.

15 SEPTEMBER, 2021



ARAR

Sida aad la socotaan waxa aan October 25, 2021 galaynaa doorashadii golyaasha deegaanka sadexda degmo ee (**QARDHO EYL IYO UFAYN**). Hadaba waxaa halkan idiinku soo gudbinaynaa qorshaha jadwalka ololaha doorashada iyo waxyaabaha ururada looga baahan yahay sida ay qeexayaan *xeerarka doorashada golyaasha deegaanka* iyo *buuga tasmada ururada siyaasadda*.

Sida uu ina farayo *xeerka golyaasha deegaanka qodobkiisa 22aad* Ololaha doorashada ururada siyaasaddu waxa uu bilaabanayaa Marka la soo dhejiyo ogaysiiska ku xusan qodobka 21aad kaasoo ka hadlaya sheegida liiska musharaxiinta. Ololuhu wuxuu soconayaa muddo 24 maalmood ah waxa uuna dhamaanayaa 48 saacadood ka hor maalinta doorashada sida ku cad isla qodobka 22aad.

JADWALKA URURADA EE OLOLAHA DOORASHADA

Guddiga Doorashooyinka ayaa diyaarinaya, soona saaraya shaxda isu-soo baxyada iyo dhoolo-tusyada qorshaysan ee ururada mudada ololaha doorashada kaas oo loogu qoondaynayo tiro maalmo ah oo isle'eg sida uu qeexayo *Qodobka 23aad* ee Xeerka Doorashada Goleyaasha deegaanka.

Hadaba **GDPL** asaga oo tixraacaya qodobkan kor ku xusan gudanayana waajibaadka masuuliyadeed ee ka saaran ololaha doorashada, waxa uu diyaariyey jadwalka maalmaha ololaha doorashada, Ururadu waxa ay leeyihiin maalmo isku mid ah (*3 maalmood ururkiiba*) si ay u gutaan howlaha ololaha doorashada.



TUSMADA OLOLAHA URURADA SIYAASADA

Maalinta	Urur Siyaasadeedka	Maalinta	Taariikh
Ololaha Koowaad			
Maalinta 1	Horseed	Axad	26/09/2021
Maalinta 2	Kaah	Isniin	27/09/2021
Maalinta 3	Shaqaalaha	Talaado	28/09/2021
Maalinta 4	Mustaqbal	Arbaco	29/09/2021
Maalinta 5	Cadaalad iyo Sinaan	Khamiis	30/09/2021
Maalinta 6	Ifiye	Sabti	02/10/2021
Maalinta 7	RunCad	Axad	03/10/2021
Maalinta 8	Mideeye	Isniin	04/10/2021
Ololaha Labaad			
Maalinta 9	Cadaalad iyo sinaan	Talaado	05/10/2021
Maalinta 10	Mustaqbal	Arbaco	06/10/2021
Maalinta 11	Kaah	Khamiis	07/10/2021
Maalinta 12	Shaqalaha	Sabti	09/10/2021
Maalinta 13	Horseed	Axad	10/10/2021
Maalinta 14	Mideeye	Isniin	11/10/2021
Maalinta 15	Ifiye	Talaado	12/10/2021
Maalinta 16	RunCad	Arbaco	13/10/2021
Ololaha Sadexaad			
Maalinta 17	Shaqaalaha	Khamiis	14/10/2021
Maalinta 18	Mustaqbal	Sabti	16/10/2021
Maalinta 19	Horseed	Axad	17/10/2021
Maalinta 20	RunCad	Isniin	18/10/2021
Maalinta 21	Cadaalad iyo Sinaan	Talaado	19/10/2021
Maalinta 22	Mideeye	Arbaco	20/10/2021
Maalinta 23	Ifiye	Khamiis	21/10/2021
Maalinta 24	Kaah	Jimce	22/10/2021

Fiiro Gaar ah:

1. Shaxda liisnaan waxaa lagu dhisay qori tuur loo sameeyey ururada 15kii September, urur walbana waxaa qoriturka uga qaybgalay wakiil.
2. Shaxdaan waxay urur kasta siinaysaa 3 beri oo kala duwan oo uu samaysan karo banaan baxyo waaweyn oo qayb ka ah ololaha ururka ee doorashooyinka 3 degmo.
3. Shaxdaan waxaa lala wadaagaayaa Hay'adaha Amniga degmo kasta, urur kastana waa in uu xiriir dhaw la sameeyaa hay'adaha amniga mar kasta uu banaan bax samaynayo si loo ilaasho xasiloonida iyo bad qabka isu soo baxayaasha.
4. Urur kasta maalinta uu leeyahay isu soo baxa waxa uu xaq u leeyahay in uu degmo kasta ama tuulooyinka hoos yimaada uu ku qabsado isu soo bax weyn.
5. Urur kasta waxa uu isu soo baxyo waaweyn qaban karaa maalmaha loo qoondeeyey oo kaliya.
6. laga bilaabo 26 bisha September ilaa 22 October waa maalmo olole, kaliya waxaa shaxdaani kala duwaysaa maalmaha isu soo baxyada waaweyn oo ku eg 48 saac ka hor maalinta doorashada.

HABDHAQANKA OLALAH A URURADA SIYAASADA

ISTICMAALKA HANTIDA DADWAYNAHA

Hantida dadweynaha waxaa loo isticmaalayaa si siman sida garoomada, meelaha barxadaha ah, idaacadaha dowladda. Ururadu waxa ay xaq u leeyihin inay si siman ugu qabsadaan ololaha doorashada. Hantida kale ay leedahay dowladda Puntland looma isticmaali karo olole doorasho ama dano gaar ah.

QABASHADA BANANBAXYADA IYO MUUQAALADA BOORARKA

Sida ay inoo qeexayaan Qodobada 23aad, 24aad iyo 25aad:

- b. Wasaaraddaha Arimaha Gudaha iyo Wasaaradda Amniga, Gudoomiyeyaasha Gobollada iyo Degmooyinka Waxaa waajib ku ah inay ku dhaqmaan shaxda ay soo saareen Guddiga Doorashooyinka xilliga olalaha doorashada. **FG.** Magaalo laguma qaban karo wax ka badan hal banaanbax isku maalin.
- t. Muqaalka boorarka waraaqadaha dacaayadaha ololaha doorashada iyo fariimaha ololaha doorashada ururada waxaa ogolaanaya Guddiga doorashooyinka islamarkaana joojinaya hadii ay ka soo horjeedaan xeerarka iyo anshaxa guud. Lama ogola boorarka iyo waraaqaha ololaha doorashooyinka in lagu dhejiyo
 - a. Masaajidada
 - b. Xafiisyada dowladda iyo gaadiidka dawladda
 - c. Xarumaha diploomaasiyiinta

d. Goobaha Ururada caalamiga ah

FG. Qofkasta oo lagu soo oogo in uu u isticmaalayo hanti qaran olole siyaasadeed waxaa la hor keeni doonaa maxakamad.

j. Hogaamiyaha ururka ayaa masuulka ah dadka ololaha wada iyo dhibaatooyinka ay sameeyaan tageerayaasha sida xasilooni darro, dhac iyo nabadgalyo xumo. Sidaa daraadeed, hadii urur taageerayaashiisu gaystaan dhibaatooyinkan waxuu Guddiga Doorashooyinku xaq uleeyahay inuu joojiyo banaambaxa waxaana laga qaadayaa tallaabada ku habboon oo sharciga waafaqsan.

x. Banaambaxyada ololaha doorashooyinka waxaa ka reeban in laqaato Hub, Labbis ciidan ama wax u eg.

Amniga Ololaha Doorashada:

1. Waxaa magaalada kasta laga asteeyay goob ay taageerayaasha urur walba ku qabaadaan isusoo baxooda. Degmada **Qardho** waxaa loo asteeyay **Barxadda Hoolka Beenyada**. Degmada **Eyl** waxaa loo asteeyay **Barxadda Dawladda Hoose**. Degmada **Ufayn** waxaa loo asteeyay **Barxadda Geedka Dhamas ka ah**.
2. Ciidanada booliiska oo ay hogaaminayaan taliyayaasha qaybaha ee 3da gobol ayaa sugayaa amniga, ciddii wadata ilaalo dawladeed waxay wargelinayaan bookiiska maalin ka hor banana-baxooda.
3. Hawldeenada iyo masuuliyiinta urur walba uga shaqaynaya ololaha, lama xaninibi karo haddii aysan danbiyo faraha kula jirin. Wixii eed ah oo loo haysto waxaa loo marayaa sifo sharci ah iyada oo la wargelinayo xafiisyada TPEC ee degmooyinkaas.
4. Urur walba waa inuu sameeyo, una gudbiyo taliska booliska dad ciidamadda kala shaqeeya amniga guud inta lagu guda jiro ololaha.
5. Xafiisyada TPEC ee degmooyinka doorashada horudhaca ah ka dhacayso, ayaa si dhow ula soconaya habsami usucodka ololaha ururada, korjoogtana ku samaydoona fulinta habraacaan.

Wabillaahi Tawfiiq